

Barnaamijka Isbeddelka Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah (VEEP)

San Diego Unified School District waxay u heellan tahay inay ardeydeeda u gudbisoo waxbarasho nashaad leh, taad oo loogu gudbineyo barnaamijyo kala duwan oo aqoontooda lagu kobcineyo. VEEP wuxuu u furan yahay dhammaan ardeyda ku nool xuduudaha gaarka ah ee oggol nidaamka VEEP. Voluntary Enrollment Exchange Program (VEEP) waa barnaamij isugu jira waxyaabo la ishu dardaray, kaas oo ardeyda ka soo jeeda dhaqamada kala duwan u oggolaaneya inay iska diiwaangeliyaan dugsiyada ka baxsan deegaanka ay ku nool yihiin. Dugsiyada Pattern ee ay waxbarashadda degmadu qoondeysay. Si aad u ogaato inaad ku nooshahay deegaan leh nidaamka VEEP iyo in kale fadlan waxaad wacdaa Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah oo telefoonkiisu yahay (619) 725-5672.

VEEP wuxuu bixiyaa:

- Kobcinta fursadaha waxbarashadda ee ba'ayada dhaqamada kala duwan
- In dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada dugsiyada so siman loo helo
- aageero tayo leh oo laga helo maamulada dugsiyada, macallimiinta, iyo la-taliyaasha
- Barnaamij K-12 ah oo u oggolaaneya inay ardeydu waxbarashadooda dugsiyada hoose ilaa dhexe ilaa sare ka sii wadan karaan ilaa uu ardeygu ka guuro nidaamka dugsiyada VEEP

Habka Arjiga

Arjiyada VEEP waxay ku kooban yihiin oo keliya dugsiyada VEEP pattern. Hal arji ayaaloo isticmaali karaa dhammaan barnaamijyada Doorashada Dugsiyada: Magnet, VEEP, Diiwaangelinta Furan, iyo Barnaamijka Doorshada Dugsiyada Dib-u-hagaajinta u baahan. Arjiyada waxaad ka heli kartaa buuggan-wrbixineed xagiisa dambe. Arjiyada la qabto wakhtiyada arjiga loogu talagalay oo ah Noofember 1 deeda ilaa Febraayo 15 keeda waxaa lagu kala derajeyn doonaan hadba isda ay u kala mudan yihiin, waxaana lagu kala saareyaa heerarka fasalka. Ikhtiyaariyada ku saabsan VEEP waxaa laga yaabaa inuu ku ekaado in ardeyda dhigata dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan marka koowaad la oggolaado inay galaan taas oo uu sharciga cusub ee soo baxay dhigeyo. Ardeyda ku jirta dugsiyada dib-u-hagaajinta u baahan ee soo dalbata VEEP waxaa mudnaan laga siin doonaa ardeyda aan ka imanin barnaamijka dugsiyada aan dib-u-haajinta u baahneyn. Dugsiyada qaarkod waxaa laga yaabaa inay ardeyd VEEP ka diiwaangelin karin ama ay ka diiwaangelin karaan oo keliya ardey xadidan ama kooban oo soo dalbatay, maadaama ay boosasku yar yihiin, isla mar ahaantaasna, barnaamijyada kale codsi ay soo gudbiyeen.

Ardeyda waxbarashadda sii wadatey loogama baahna inay soo gudbiyaan arjiga Doorashada Dugsiyada:

Ardeyda waxbarashadda sii wadata waa ardeyda ku jirta dugsiyada VEEP ee rabta inay u beddeshaan dugsiyada VEEP ee jirankooda ku yaala wakhiga ay ardeydu u kala gudbeyaa heerarka –hoose ilaa dhexe, dhexe ilaa iyo dugsiyada sare.

Panuntunan ukol sa Transportasyon

Gaadiid waa la siin doonaa ardeyda ka diiwaangashan dugsiyada VEEP pattern ee la ansaxiyey. Sharciyada gaadiidka degmadu ay bixiso barnaamijkan wey khuseeyaan, sida ay barnaamijyada kale ee degmada ee gaadiidka la xidhiidha ay u khuseeyaanba. Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in:

- Si loo sameeyo marino iyo waddooyinka ay basasku marayaan waxaa muhiim ah in la helo siddeed ardey oo halkaas baska ka raacaysa.
- Gaadiid qaada lama siineyo ardeyda dugsiyada hoose ee gurigoodu masaafad dhan 2.0 u jiro iyo kuwa dugsiyada sare oo 2.5 maayl u jira.
- Gaadiid ardeyda qaada lama siineyo dugsiyada deegaanka.
- Goobaha ay ardeydu baska ka raacayso ama ku deggayso guud ahaan waa inay u dhaw dahaya dugsiyada deegaanka ee ardeyga.
- Ardeyda dugsiyada hoose waxaa looga baahan yahay inay masaafo jirta hal maayl u lugeyn karaan meesha ay baska ka raacayaan, ardeyda dugsiyada sarena u lugeyn karaan masaafo dhan laba maayl meesha y baskanka qaadan karaan.



Wac (619) 725-5672

si aad nidaamka
VEEP u ogaatid!
Araajida waa inay la soo
gudbiyaa inta u dhexeysa

Noofember 1 deeda ilaa iyo
Febraayo 15 keeda.